

Sidan samee, markaad adiga ama carruurtaada ku aragtid calaamada caabuqa

Caadi ahaan u ma baahnid in aad iska sooqaado baaritaanka koronaha, haddii calaamadaha caabuqa uu fududyahay.


Guriga joog haddii aad leedahay calaamadaha neefsashada sida qufaca, hargab ama qandho. Waad ku noqon kartaa, goobaha waxbarashada, iskoolka, xannaanada ama shaqadaada, marka aad dhowr maalmood aadan lahay calaamadaha caabuqa ama ay kaa fududaadaan.

Haddii aad samaysay baaritaanka koronaha oo lagaa helay, waa in aad iska ilaalisa la Xariirka dadka kale inta aad leedahay calaamadaha caabuqa, uguyaraan 5 maalmood.

Calaamadaha fudfudud ee caabuqa waa in aad tagtaa baaritaan, haddii

- xirfadleyaasha caafimaadka ay kugula taliyaan in aad baaritaan aadid
- waxaad ka shaqaysaa daryeelka bulshada iyo caafimaadka ee shaqada macmiilka ama bukaanka (adiga oo tixgelinaya tilmaamaha lagugu hagay ee goobtaada shaqo)
- Waxaad ka mid tahay dadka halista u ah in ay qaadaan caabuqa koronaha, waxaa lagula talinayaa in aad qaadato tallaalka afaraad, ama in aad si joogta ah isugu daaweysaa isbitaalka (sida sifaynta ama daaweynta kansarka).
- Haddaad uur leedahay.

Haddii aad leedahay calaamado daran, la xiriir si aad talo u heshid xanaanada xarunta caafimaadka shaqaalaha, xaruntaada caafimaad, ama adeegyada la talinta caafimaadka si aad talo u hesho 03 5657 0023 (maalin kasta saacadda 7 - 22). Marka ay xiran yihiin, waxaad wici kartaa gargaarka heeganka ah 116117.



Sideen u heli karaa baadhitaanka koronaha?

Marka ay tahay inaad baadhitaanka tagto, sidan u dhaqan:

- ka buuxi [cabiraadda xaaladda koronaha ee adeegga Omaolo.fi](https://www.cabiraadda.xaaladda.koronaha.ee/adeegga/Omaolo.fi) internetka ama
- wac adeegga caafimaadka:
 - Wac daryeelkaaga caafimaadka, xaruntaada caafimaadka ama lambarka la talinta adeegga caafimaadka oo lambarkiisu yahay 03 5657 0023 (maalin kasta saacadda 7–22).
 - Dadka lixaad la'aanta maqalka ama hadalka qaba waxaay farriin ku soo diri karaan lambarka 040 639 7700 (maalin kasta saacadda 7–22).
 - La talinta caafimaadka adeeggu markuu xidhanyahay, wac lambarka la talinta koronaha ee Tays 03 3116 5333.
 - Marka xaaladda gurmada ah lagu jiro 112.

Marka ad hesho wakhtiga baadhitaanka ee ku jira adeegga internetka Omaolo ama taleefanka, waxaad tagi kartaa. Baadhitaanka koronaha waxaa lagu qaadaa Tampere:

- Goobta baadhitaanka lagu qaado ee Nekala, *Viinikankatu 44*: [Khaariddada Nekala iyo hagitaanka imaatinka ee finnishka ah](#) (pdf)

Natiijada baadhitaanka koronaha

Waxaad helaysaa maalin ama labo maalmood kaddib fariin qoraal ah oo laguugu sheegayo natiijada baadhitaankaaga. Waxaad sidoo kale ka arkaysaa adeegga internetka ah ee

[Omakanta.fi](https://www.omakanta.fi). Guriga sii joog illaa wakhtigaas laga gaadhayo. Hala kulmin dad kale.

- Haddii natiijada baadhitaankaaga koronuhu uu yahay mid *negatif* (CV19Nho NEG), baadhitaanka lagaa qaaday kuma cadda inaad leedahay.
- Haddii natiijada baadhitaankaaga fayruska koronuhu ay tahay mid boositif ah (CV19Nho POS), waxaad leedahay cudurka fayruska koronaha.

